

YAA CODAYN KARA

Waad codayn kartaa haddii aad:

- jirto 18 ama ka wayn 5 Maajo 2016
- tahay British, EU ama muwaadin u qalma ee Barwaaqa-sooranka – Commonwealth
- ku nooshahay London
- u diiwaangashan tahay codayn ugu dambayn 18 Abriil 2016.

Waxaad iska diiwaangelin kartaa inaad codayso www.gov.uk/register-to-vote ama la xiriir dawladdaada hoose.


WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Bisha Abriil, qof kasta oo u diiwaangashan codayn ee London wuxuu helayaa buug-yare doorashada ku saabsan. Tani waxaa ku taxan liiska dhammaan musharixiinta Golaha Baarlamaanka London, ay la socdaan qorshayaal shaqo kooban ee ka socda musharixiinta Duqa Magaalada iyadoo ku siinaysa waxoogaa macluumaad ah ee ku saabsan sida loo codeeyo. Ka eego inuu kuugu yimaado albaabka.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah fadlan la xiriir:
info@londonelects.gov.uk
020 7983 4444


SIDEE LOO CODEEYAA

Waxaad lagu siin doonaa 3 waraaqo codayn oo aad ku codaynayso




Duqa Magaalada London (warqadda codaynta midabka binkiga leh)

- Waxaad leedahay 2 xulasho ee Duq Magaalo.
- Codee hal mar [X] ee qaybta A ee xulashadaada koowaad.
- Codee hal mar [X] ee qaybta B ee xulashadaada labaad.



Xubin Golaha Baarlamaanka London u matasha Degmada (warqadda codaynta huruudda ah)

- Xulo cidda aad u doonayso u matalaadda degaankaaga Golaha Baarlamaanka London.
- U codee kaliya hal musharax adigoo is-tillaab ku samaynaya [X] halka ku aaddan xulashadaada.



Xubin Golaha Baarlamaanka London u matasha guud ahaan London (warqadda codaynta oranjiga ah)

- Xulo cidda aad u doonayso u matalaadda London guud ahaan Golaha Baarlamaanka London.
- Codee kaliya hal mar adigoo is-tillaab ku samaynaya [X] sanduuqa ku aaddan xulashadaada.

DOORASHOYINKA DUQA MAGAALADA LONDON & GOLAHA BAARLAMAANKA LONDON



HAGAHAAGA CODAYNTA



YOUR LONDON. YOUR VOTE

Maalinta 5 Maajo 2016, dadka ku nool London waxay u codayn karaan Duqa Magaalada London iyo 25 xubnood ee Golaha Baarlamaanka London (London Assembly).

Duqa Magaalada wuxuu maamulaa miisaaniyad ah £17bilyan. Tani waxaa loo isticmaalaa wadida adeegyada muhiimka ah ee London sida nabadgelyada, dab-damiska iyo gaadiidka. Waxay sidoo kale caawinaysaa shaqada shaqaalaha Aqalka Magaalada (City Hall).

Golaha Baarlamaanka London wuxuu ka kooban yahay 25 dad ah iyadoo la xisaabtamaya Duqa Magaalada iyadoo matalaya dadka reer London. Waxay sidoo kale si joogto ah su'aalo u waydiinayaan Duqa Magaalada iyadoo baaraya arrimaha muhiimka ah ee London.


GOORMA AYAA LA CODAYNAYAA

Waa inaad timaadaa waqti aad u horreeya. Sharciyan, haddii aadan joogin goob codayn ama aad saf ugu jirto bannaanka sugitaanka ee waraaqahaaga codaynta waqtiga 10pm, ma codayn kartid.

Haddii aad ku codaynayso boosto ahaan, waxaad helaysaa waraaqahaaga codaynta ka hor doorashada. Waa inaad xaqiijisaa inaad soo celiso ugu dambayn 10pm ee 5 Maajo.

HALKEE LAGU CODAYNAYAA

Waxaa jira 3 qaab oo aad u codayn karto.



Goobta codayntaada

- Ka hor 5 Maajo waxaa lagu soo dirayaa 'kaar codayn' ay ku faahfaahsan tahay goobtaada codaynta.
- Waxaad kaliya ka codayn kartaa goobta codaynta ee lagu magacaabay kaarkan.
- Shaqaalaha goobta codaynta ayaa kaa caawin kara fahamka warqaddaada codaynta haddii aad u baahan tahay.
- Qasab ma ahan inaad kaarkaaga codaynta u qaadato goobta codaynta laakiin waxay caawinaysaa shaqaalaha.

Haddii aadan aadi karin goobta codaynta qof ahaan, waxaad codsan kartaa inaad ku codayso boosto ahaan ama qof ku matalaya.

2

Boosto ahaan

- Warqaddaada codaynta waxaa lagu soo dirayaa qiyaastii usbuuc ka hor maalinta doorashada.
- Calaamadi codayntaada dibna u soo dir si ay u yimaadaan ka hor 10pm ee 5 Maajo 2016.
- Waa inaad xasuusataa dhammaystirka caddaynta ammaanka oo wata saxiixaaga iyo taariikhda dhalashada.
- Haddii aadan codkaaga ku soo celin waqtigii loogu talagalay, lama tirinayo.
- Haddii aad ilowday inaad boosto ku soo dirto, waxaad u qaadi kartaa codkaaga boosto ee la buuxiyay goobta codaynta adigoo ku ridaya bashqadda la socota.

Waa inaad ku soo celisaa codsigaaga boosto ku codaynta xafiiska diiwaangelinta doorashada ee dawladda hoose ugu dambayn 5pm ee 19 Abriil.

3

Isticmaalidda qof ku matalo

- Haddii aadan awoodin aadida goobta codaynta waxaad waydiisan kartaa qof aad aaminsan tahay inuu ku matalo.
- Tani macnaheedu waa inay kuu codayn karaan laakiin waa inaad u sheegtaa cidda aad u codaynayso.

Waa inaad ku soo celisaa codsigaaga qof ku matalaya inuu kuu codeeyo xafiiska diiwaangelinta doorashada ee dawladda hoose ugu dambayn 5pm ee 26 Abriil.

Ka ogow wax badan
londonelects.org.uk
[@LondonElects](https://twitter.com/LondonElects)
[#LondonVotes](https://twitter.com/LondonVotes)